

**A.F. I. S**

**Xeerka 31 Oktoobar 1956, lamba. 113 rep**

**Guurka dhex mara muwaadininta aan Muslimka ahayn**

**MAAMULAH**

Marka uu arkay dekeretada 18 Maajio 1956, lamba. 78, (Xeer Nidaamiyaha Xukuumadda Soomaaliya);

Marka uu arkay Amarka 24 Feberaayo 1953, lamba. 5, oo ku saabsan abuuridda adegyada diiwaangelinta dadka iyo arrimaha madaniga ee Dalka iyo Dekereetada 25 Feberaayo 1953, lamba. 22 oo lagu sheegay xeerka lagu fulinayo;

Marka uu garowsaday baahida lo qabo in la nidaamiyo guurka iyo furiinka iyo baabi'inta ka dhexeeya muwaadiniinta aan muslinka ahayn, oo ay ku dhawaaqueen masuulinti kala duwaan ee Qaaliyaasha;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA:**

Muwaadiniinta aan muslinka ahayn, Maamulada Dawladda Hoose waxay oggolaanayan diiwaangelinta ku xusan qod. 7 ee Amarka 24 Feberaayo 1953, lamba. 5, xitaa shahaadooyinka ay soo saaran masuulinta rayidka iyo diimaha ka duwan kuwa qaaliyada haddii ay yihiin masuuliin ku dhaqanka Dalka loo oggolyahay.

Muqdisho, 31 Oktoobar 1956.

**Anzilotti**

Lagu hubiyay lamba. 618, 3 Nofember 1956.

Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La hubiyay lana Diiwaangeliya – Diw. Lr. 20 - lr.116.

Muqdisho, 31 Nofember 1956.

Hantidhawraha Guud: **Spadaro**